



# DULMARKA GUUD EE WARBIXINNADA BAARISTA 2022

**XAFIISKA  
HANTIDHAWRKA GUUD  
EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

## WARBIXINTA SANNADLAHA EE BAARISTA U HOGGAANSANAANTA SHARCIGA

Sannad Maaliyadeedka Dhammaaday  
31<sup>da</sup> Disseembar 2022

TAARIKHDA LA BAAHIYAY  
Juun 2023

Horumarinta hannaanka isla xisaabtanka iyo daah-furnaanta maamulka, si loo gaaro Soomaaliya isku filan.

**XAFIISKA  
HANTIDHAWRKA GUUD  
EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

## BAARISTA WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANADLAHA EE DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Sannad Maaliyadeedka Dhammaaday  
31<sup>da</sup> Disseembar 2022

TAARIKHDA LA BAAHIYAY  
Juun 30, 2023

Shilin kasta oo ay leedahay dowladda Federalka Soomaaliya waa in la hubiyaa.

**XAFIISKA  
HANTIDHAWRKA GUUD EE  
JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

## WARBIXINTA BAARISTA GAARKA AH, SAFALARADAHA LA BAARAY EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Sannad Maaliyadeedka Dhammaaday  
31<sup>da</sup> Disseembar 2022

TAARIKHDA LA BAAHIYAY  
Luuliyo, 2023

Shilin kasta oo ay leedahay Dowladda Federalka Soomaaliya waa in la hubiyaa

Warbixinnadan iyo dulmarkoodaba waxaa laga heli karaa  
[www.oag.gov.so](http://www.oag.gov.so)



# DULMARKA WARBIXINTA BAARISTA U HOGGAANSANAANTA SHARCIGA

Waxaa labaaray: 15 hay'adood | Wadarta khaladdaadka: 106 | Wadarta miisaaniyadda DFS sannadkii 2022: US \$944M | Wadarta miisaaniyadda la baaray US \$539.4M (58%)

 XAFIISKA  
HANTIDHAWRKA GUUD  
EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA



## WARBIXINTA SANNADLAHA EE BAARISTA U HOGGAANSANAANTA SHARCIGA

Sannad Maaliyadeedka Dhammaaday  
31<sup>da</sup> Disembar 2022

 TAARIKHDA LA BAAHIYAY  
Juun 2023

“ Horumarinta hannaanka isla xisaabtanka iyo daah-furnaanta maamulka, si loo gaaro Soomaaliya isku filan.

**Hay'adaha la baaray ayaa sameeyay iib dhan US \$60M, iyaga oo aan lahayn qorshe iib sannadle ah.**



Waa in hay'adaha ay diyaariyaan qorshe iib sannadle ah, la ansixiyay, waafaqsan miisaaniyadda qaranka sida uu qabo Sharciga libka.

**436 Dhulal iyo dhismayaal dowladeed ayaa ku jira gacmo gaar ah.**



Waa in hay'adaha DFS ay ku dadaallaan dib-u-soo celinta dhismayaasha iyo dhulalka ka maqan gacantooda.

**Heshiisyo deeq lacageed oo dhan US \$38.8M ayna heleen (7) hay'adood ayaan lagu darin miisaaniyadda qaranka ee baarlamaanku ansixiyay.**



Waa in dhammaan hay'adaha DFS ay xaqijiyaan in miisaaniyadda qaranka lagu daro deeqaha ay dibedda ka helaan.

**Sagaal (9) ka mid ah hay'adaha la baaray ayaan sameyn baaraha gudaha.**



Waa in dhammaan hay'adaha DFS ay sameeyaan ayna hawlgaliyaan hubinta gudaha ee baaraha gudaha.



# DULMARKA WARBIXINTA BAARISTA MAALIYADEED



XAFIISKA  
HANTIDHAWRKA GUUD  
EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA



## BAARISTA WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANADLAHA EE DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Sannad Maaliyadeedka Dhammaaday  
31<sup>da</sup> Disseembar 2022

TAARIKHDA LA BAAHIYAY  
Juun 30, 2023

Shilin kasta oo ay leedahay dowladda  
Federalka Soomaaliya waa in la hubiyaa.

✓ | **FIKRAD NADIIF AH**

XISAAB-XIR LOO  
DIYAARIYAY SI SAXAN

✓ | **FIKRAD CILAD LEH**

XISAAB-XIR LOO DIYAARIYAY  
SI SAXAN BALSE LEH KHALAD YAR

✗ | **FIKRAD CILAD WEYN LEH**

XISAAB-XIR LOO DIYAARIYAY  
SI AAN SAXANAYN

✗ | **FIKRAD NAQDIN**

XISAAB-XIR AAN LAHAYN CADDEYMO  
KU FILAN OO KU HABBOON



## FIKRAD CILAD LEH

Dukumentiyada taageeraya  
kharashaad dhan US **\$19.32M**  
oo si toos ah loogu kala diray  
Maamulka Gobolka Banaadir, Rugta  
Ganacsiga iyo Bangiga Horumarinta  
Soomaaliya ayaan la inala wadaagin  
si loo baaro.

Warbixin maaliyadeedka la baaray ee  
Shirkadaha Favori iyo Albayrak ayaan  
loo soo gudbin baaris hantidhawr, si  
aan u xaqiijino saxnaanta khidmad  
dakhli dheef-wadaag ah oo dhan US  
**\$32.44M** oo ay DFS heshay.



Nuucyada Fikradaha Baarista  
Maaliyadeed

Lacag dhan US **\$38.76M** oo dheeri ka  
ahayd miisaaniyadda oo ay heleen  
todobo (7) hay'adood ayaan lagu soo  
muujin lacag qabashadooda, lacag  
bixintood iyo haraagooda Warbixinta  
Maaliyadeed ee DFS.

Dakhli dhan US **\$1.9M** oo ay uruuriyeen  
Safaaraddaha JFS ee Kenya, Turkiga,  
iyo Jarmalka ayaan loo maamulin si  
wannaagsan laguna darin warbixinta  
maaliyadeed.



# DULMARKA WARBIXINTA BAARISTA GAARKA EE SAFAARADAHU LA BAARAY EE JFS

## Kenya, Turkey iyo Germany

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WARBIXINTA BAARISTA GAARKA AH, SAFAARADAHU LA BAARAY EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Sannad Maaliyadeedka Dhammaaday  
31<sup>da</sup> Disseembar 2022

TAARIKHDA LA BAAHIYAY  
Luuliyoo, 2023

“ Shilin kasta oo ay leedahay Dowladda Federalka Soomaaliya waa in la hubiyaa ”

**Xeerka iyo teriifada ururinta dakhliga Safaaradaha oo aan la hirgalin.**



Dakhliga ay uruuriyeen safaaraddaha la baaray oo dhan US \$3M ayaan lagu soo shubin Khasnadda Dhexe ee Dowladda, iyadoo sidoo kale dakhliga qaar lagu qabtay cadaan (cash).



**Safaaradaha la baaray ma lahayn qorshe miisaaniyadeed gaar ah oo ku aadan dakhliga & kharashaadka ay hadda maamulaan**



**Shakhsiyaad aan buuxin shuruudaha diblomaasiyadeed ayaa loo magacaabay shaqada arimaha dibadda.**



**Waa in Wasaradda Arrimaha Dibedda & Wasaaradda Maaliyadda ay xaqiijiyaan in 6 bilood ay ku hirgaliyaan xeer iyo terifo gaar ah oo lagu maamulo dakhliha Safaaradaha.**

**Waa in Safaaraduhu ay u hoggaasamaan sharciga maareynta maaliyadda guud oo dakhliga aan caddaan lagu qaban, dakhligana lagu soo shubo Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ka hor inta aan la istcimaalin.**

**Waa in Wasaaradda & Hay'adaha kale ee DFS ay xaqiijiyaan in Safaaradaha loo qoondeeyo miisaaniyad ku filan, khaladaadkana loo siiyo si rubucle ah si ay waajibaadkooda u gutaan.**

**Waa Wasaaraddu u hoggaansantaa sharciga shaqada arrimaha dibedda oo ay shaqaaluhu ka shaqeeyaan Xarunta Dhexe ee Wasaaradda ugu yaraan laba sano ka hor inta aan loo magacaabin Safaaradaha.**



# Farriinta

## Hantidhowraha Guud, JFS

Dhammaan saraakiisha iyo howlwadeenada ka howlgalla illaha Dakhliga ee Dowladda Federaalka Soomaaliya waxaa waajib ku ah in ay Dakhliga Dowladda u qabtaan u xisaabiyaan uguna xareeyeen khasnadda dhexe ee dowladda si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud iyo Sharciga libka iyo Qandaraasyada Qaranka. U hoggaansanaanta Sharcigu waxa ay noo horseedi kartaa hagaajinta howlaha hey'adaha dowladda iyo hirgelinta dowlad wanaagga.